

1 KU SAABSAN KULLIYADA IYO KULLIYADA: KULLIYADA & MIHNADA ISKU XIDHKA

Shakhsiyaadka sida digriiga **kulliyada** waxay shaqaystaan \$1 milyan wax ka badan noloshooda oo dhan marka la barbar dhigo kuwan sita dibloomada dugsiga sare. (Khan Academy, 2014).

WAXA WAXBARASHADDA AY U QABTO RIYADAYDA SHAQO AY U BAAHANTAHAY?

Waxaad kala dooran kartaa boqolaal ah **shahaadooyin sare** iyo **shahaadooyinka**. Caadi ahaan, badanku waxay ukala baxaan laba qaybood: **farshaxanka ama shaqadu ugu soo horayn karto.**

KUWA SHAQADU UGU SOO HORAYN KARTO EE SHAHAADADAHA SARE IYO SHAHAADOOYINKA

kaas oo xooga saara horumarinta xirfado gaar ah iyo aqoonta wixii ah **mihnadaha gaarka ah**

- Bay'olajiga bada
- Fanka wax karina
- Daraasadaha sharciga
- Injineernimada
- Sixada ilkaha

* SAMEE CILMI BAADHID:

Cilmi baadhid ku samee kulliyadaha kala duwan si aad u fahanto kuwa bixiya barnaamijka shahaadada, ta sare ama/iyo digriiga aad u baahantahay mihnadeeda. Waxa aad doorataa waxa uu saamayn doonaa inta ay tahay lacagta aad shaqaysataa.

FARSHAHANKA SHAHAADOOYINKA SARE

oo ay kamid yihiin suugaanta, falsafada, taariikhda iyo lkuqaddaha. Shahaadooyinkan sare way ka ballaadhanyihiin oo waxay keeni karaan shaqooyin kala duwan oo aan u baahnayn aqoon gaar ah ama farsamo.

- Ingriisiga** – tafatiraha, fuliyaha suuq gaynta, qoraaga
- Luqadda ajnabiga ah** – sarkaalka adeega ajbaniga, turjubaan, macalin
- Cilmiga siyaasada** – abaabulaha bulshadda ama qofka bulshadda u dhaqdhaqaaqa, qareenka, baadhaha siyaasada
- Cilmi nafsiga** – cilmi baadhaha suuqa, shaqaalaha bulshadda, la taliyaha caafimaadka maskaxda

MA GARANAYSID WAXAAD DOONAYSO INAAD WELI SAMAYSO?

- 1 Ka feker danahaaga.**
Qor fikradaha shaqada iyo xiisaha oo ka dib cilmi baadhid ku samee sida ay ugu xidhmi karaan shaqo.
 Booqo careerbridge.wa.gov si aad u sahamiso mihnadaha.
- 2 Go'aan ka gaadh sida loogu qalmo shaqooyinka kala duwan.**
 Baro **shuruudaha shaqada** (xirfadaha, fasalada, digriiyada gaarka ah ama tababarka, iwm.)
La hadal la taliyaha mihnada, macalinka ama xubinta qoyska.
- 3 Ka hel khibrad.**
 Mutadawic noqo, hel **tababarka shaqo** ama **bixinta khibrada shaqo**.

MAARSO: FASALKA 9 iyo 10